JAMHUURIYADDA SOMALILAND
Golaha Wakiiladda

Date: 18 January, 2012

War-bixinta Mudanaasha ee Kormeerka Gobollka Saaxil

Presented by:

1. Mud. Siciid Cilmi Rooble
2. Mud. Maxamed Xuseen Ciise
3. Mud. Faarax Maxamed Cabdulle
4. Mud. Siciid Cartan
5. Mud. Maxamed Faarax Qabile
6. Mud. Maxamuud Xaaji Jaamac Dable
7. Mud. Axmed Xasan Adan (Wayso-Cade)

HORDHAC (Introduction)

Golaha wakiiladda Somaliland oo ah Gole Qaran oo ka mida sadexda dhar-dhaar ee Qarankani ka koobanyahay, Golaha hadda jooga waxaa uu ku yimi nidaam dimuqoraadi ah oo ah hal nin hal cod ***(One Man One Vote)*** sanadkii **2005.**

Golahan oo ka kooban **82** mudane oo laga kala doortay lixda Gobol ee Somaliland ee kala ah ***Saaxil, Togdheer, Sanaag, Sool , Maroodi-jeex iyo Awdal .***

Gobolkaastaa wuxuu soo doortay tiro kuraas ah oo u cayiman kuwaas oo uga mid noqondoona Mudanayaasha Golaha Wakiiladda ee Somaliland.

Haddaba Gobolka Saaxil oo ah Gobol dhaca badh-tamaha Somaliland leh-na xeeb aad u dheer kuna yaala goob muhiim u ah Qarankan iyo dhismaha dawladnimo ee Somaliland, Gobolkani saaxil waxaa ku yaala Dekeda Berbera oo ah isha qusha ee soo saarta dakhliga ugu badan ee Qarankani Somaliland helo,.

Haddaba, Gobolkani waxaa uu soo doortay tiro kuraas ah oo dhan **10** xildhibaan kuwaas oo u matali doona Wakiilada Golahani ka koobanyahay.

18 Janaury, 2012 ***(Arbaca)*** ayaa koox mudanayaal ah oo ka tirsan xildhibaanada Golaha Wakiiladda ee laga doorto Gobolkan, waxay safar shaqo ugu ambabaxeen caasimada Gobolka saaxil ee berbera, iyagoo ujeedada safarkooduni ahaa xog-ogaal u noqoshada iyo xaal ogaanshaha dadkii soo doortay iyo deegaanadii laga doortay marxalada ay ku suganyihiin **(Constituency Consultation).**

18-Janaury, 2012 ***(Arbaca)*** **8:00 pm** waxay guddidu ugu horeyn la kulmeen madaxda Gobolka sida Badhasaabka, Mayor-ka Xoghayaha Dawlada Hoose. Waxayna guddida ugu horeyn ka war-bixinyeen ujeedada safarkooda.

Intaa ka dib Duqa Magaalada Berbera Cabdalle Xaaji Cali ayaa ka waramay waxa u qabsoomay, wixii ka qabyo ah ee u baahan in wax laga qabto iyo xaalada guud ee gobolku ku suganyahay waxaana isna hadalkiisa ku sii daray badhasaabka Gobolka Saaxil **Mudane Ramaax** oo ka war-bixiyey xaalada guud ee Gobolka.

I. XAALADA AMNI EE GOBOLKA

Xaalada guud ee dhinaca amniga Gobolka saaxil waa mid aad u saraysa oo amaankeedu uu yahay mid sugan, dadka gobolkan ku dhaqana iyagaa amnigoo ilaashada oo dhamaantood meel bay ugu soo wada jeedaan waxkasta oo ay ka shakiyaan in uu amnigooda wax yeelayo, Berberi waxay gobolada kale kaga duwantahay la iskuma qabsado dhulka kaas oo gobolada kale inta badan ay ka dhacaan isku dhacyo ay sababeen isku qabsi dhulka kaas oo sababa dhimasho iyo dhaawac, Berbera inta badan kama dhacaan kiisas dil ah.

II. CAAFIMAADKA

Guud ahaan xaalada caafimaadka ee Gobolka Saaxil maaha mid sidii la doonayey u wada shaqeeya, hadda waxaan samaynay laba gaadhi oo ***Ambulance*** ah oo ka shaqeeya labada wado ee Bari iyo Galbeed ugu kaca Berbera oo badanaaba shililku ka dhici jireen. Tuulooyinka uu ka koobanyahay gobolkan saaxilna waxaanu degmo walba ku amarnay in ay keensadaan qof degmada u dhashay oo loogu tababro kal-kaaliye caafimaad ***(Nurse).*** Si ay tuulada wax uga tarto, sidaa waxaa noo sheegay madaxda Gobolka Saaxil.

III. WADOOYINKA

- Dhinaca wadooyinka guud ahaan magaalada Ber-beri waxaa weeyaan magaalada ugu wadooyinka badan uguna wadooyinka quruxda badan.
- Wadooyinka oo dhamaantood la dhisay intii ay Somaliland la soo noqotay Gooni isu taageeda **1991.**
- Waxaa jirta biriishkuu u dhaxeeya berbera iyo sheik oo dhexda ka dumay oo u baahan dayactir kaas oo marki hore lagu qiimeyey hagaajintiisa lacag dhan $7,000 ***(Todaba ku oo dollar).*** Hase ahaatee ninka haysta rugta ganacsiga **(Chamber Commerce**) ayaa ah caqabada hortaagan dayactirkan biriiskan intii aanu isku haysanay bixinta qandaraaskan ayaa waxaa kordhay godkii biriishkii dhexda kaga yaalay hadda waxaa lagu qandaraasay hagaajintiisa lacag dhan **$27,000** dollar ***(todoba iyo labaatan kun oo dollar).***
- Waxa jirta wado xumi haysta xeebta Bariga uga kacda berbera dhinaca **Laasciid** iyo xeebta galbeedka uga kacda berbera dhinaca **Bulaxaar.**

IV. WAXBARASHADA

Waxbarashada Gobolka waa mid aad u liidata sababta oo ah ma joogaan macalimiid tayo leh, mida kale hadii macaliintu ka yimadaan magaalooyinka kale nolasha magaalada berbera oo qaali awgeed iyo waxa uu mushahar u qaadanayo awgeed ayaa sababa in uu qofku ka cararo.

V. CIIDANKA ILAALADA NABAD-GELYADA (*POLICE*)

Dhinaca ciidinka ***POLICE*** ee Gobolkan saaxil waa mid tirada joogta ay aad u yartahay, sida ay noo sheegeen madaxda iyo odayaasha Gobolku, waxaa ay yidhaahdeen marka aad is tidhaa wiil cusub qorna waxaa ay dawladu ku waydiinaysaa qori uu wato qofka la qorayo askarinimadu , taasina waa carqalada na haysta.

VI. DAWLADA DHEXE

Dawlada dhexe ee Somaliland waxaad moodaa dhamaan in ay ka wada maqanyihiin gobolka, waxaa u xidhan dawlada dhexe ee Somaliland **260 Guri**, Dawlada Dhexe ee Somaliland waa mid Gobolka ka wada maqan, haday tahay wasaaradaha Dawlada dhexe oo dhan waxa kaliya oo jooga oo ay isuduwayaashoodu ka shaqeeyaan gobolkani saaxil in yar oo tiro tirsan ah, intana waxaa ay gobolka ka hawl galeen intii badhasaabkan cusub joogay Mudane Ramaax.

VII. HOR UMARKA GOBOLKA

- Hor umarka gobolku waxaa uu ahaa mid aad u wanaagsan oo aad u sareeyaa wallow ay wali waxbadan dhiman yihiin oo muhiim ah haddana waxaa Gobolka ka socday **36** mashruuc oo ay wadeen Dawlada Hoose ee magaalada Berbera ee uu horumaadka ka yahay Maayorka Magaalada **Cabdalle xaaji Cali**, mashaariicda uu waday waxaa ka mid ahaa Garoon wayn oo lagu ciyaari doona kubada cagta oo aanu isleenahay wuxuu noqondoona garoonka ugu wayn Somaliland.

- Waxaa kale oo iyana ka mid ahaa mashaariicda ay waday dawlada hoose ee Berbera, guryo ay gali doonaan shaqaalaha Dawlada Hoose ee Berbera.

- Waxa u baahan in la horumariyo Warshada Sibidhka ee berbera ***(Shamiitada)*** iyo **NEC FISH** oo hadii ay furmi lahaayeen guud ahaan dhalinyada iyo bulshada gobolkani saaxil ay ka faa'iidaysan lahaayeen kani heli lahaayeen shaqo abuur badan

- Maalintii aanu gobolka tagnay ee bishu ahayd 18-Janaury, 2012, waxaanu ka qayb-galnay xaflada Dekeda Berbera dhex-deeda kul kala wareegeyeen mishiin dab dhaliye ah **(Electric Machine)** warshada korontada iyo Maareeyaha Dekeda Berbera Eng. Cali Cumar (Cali Xoor-Xoor), waxaa kale oo Eng. Cali Xaflada ka sheegay in ay soo socdaan laba kale oo Machine oo kan noociisa ah oo ay yeelandoonto warshada laydha ee berbera. Waxaana bixiyey qarashka mishiinada xumuumada Somaliland oo waxay ugu jirtay miisaaniyada gobolka

- Berberi waxay ahaan jirtay berigii hore xero ciidan oo ay dawlado badani kala dhaxleen, markaa afarta koonaba Berbera waxaa kaga xeeran xero military Berberina maalinba maalinta ka dambaysa way dhismaysaa oo way sii balaadhaysaa, miskilada haysataana waxaa weeyaan xeryahan ciidamanada ee afarta koonabada kaga xeeran oon ogalayn in loo soo dhawaado, siduu xeerarkii hore ee Somalia iyo dawladii hore ee ka horeeyeyba dhigayo ciidanka qaran Somaliland ee hadda joogaana ay map kooda ku haystaaan, in aan looga soo dhawaan Karin in ka dhaw hal kiloomitir **(1km).** taasina waxay cuuryaaminaysa koritaankii magaalada Berbera madaamada afarta koonabada ay kaga xeeranyihiin xeryo ciidan,

- **DOORASHADA IYO ARRIMAHEEDA**

Arrimaha Doorashada ee gobolka guud ahaan muwaadiinka waa ay ka cabanayaan waxaana ay kaga cabanayaan dhawr arrimood oo kala ah.

1. Dadku somaliland waxay ku kala cod-badanyihiin sida ay u kala sanaaquud badanyihiin, goobaha sanaaduuqda cod-bixinta oo aad u yar ***(less poll stations),*** berbera gudaheeda waxaa laga codeeyaa oo kaliya **16** goobood. Halka ay Berbera ilaa geelo kor aanay u dhaxaynin hal sanduuq oo cod laga bixiyo.

2. Berbera waxa ay doorashadu ku soo beegantaaa xili kulayl ah ***(Summer time)*** oo aanay dad badan joogin taasina waa carqalad haysata dadka ku nool gobolkani saaxil. Waxayna sababtay in tiro cod oo yari ay gobolkani ka codeeyaan.

VIII. DEEQAHA

- Deeqa caalamiga ah gobolkan waxba kama soo gaadhaan, Hay'adda cuntada aduunka ee **WFP** waxaa ay ku leedahay berbera hangar waaweyn oo ay raashinka ku kaydsadaan, hase ahaa wax ay gobolkani ugu ogalyihiin ma jirto oo raashinka waa laga soo raraa oo wuu soo dhaafaa ***(Transit),*** mida kale hay'adda **WFP** shaqaalaha ay berbera uga shaqaynaya waxaa ay ka keenaan gobolada kale hadii ay tahay shaqaale hoosaad iyo hadii kaleba.
- Dhibaadatada kale ee jirta waxa weeyaan hay'adda **WFP** waxay cadaysatay oo ay si qaawan u tidhi anagu Gobolkani saaxil uma aqoonsanin gobol ahaan waxaa aanu gobol u aqoonsanahay oo kaliya hargeysa (**WAQOOYI GALBEED**).
- Waxaa berbera ka soo dega baabuur aad u quruxbadan oo loogu soo deeqay ciidanka Police Somaliland hase ahaatee berbera ahaan waxba nalagama siiyo ee waxay nagu dhaafaan transit.

IX. MACDANTA GOBOLKA

Waxaa jira macdano aan badnayn oo gobolkan laga soo saaro hase ahaatee aan ahayn wax macno badan lahayn oo qofka la soo baxayaba tacabkii ka galay iyo waxaa uu ka helay ay kala badan yihiin, marka badhsaabka gobolka Saaxil Mudane Ramaax waxaa uu noo sheegay in uu ka joojinayo dadka aan macnaha badan wadin inta la helayo kambaniyo waawayn oo soo saaro macdan badan.

X. SOO- JEEDINTA GUDDIDA.

Guddida waxaa ay u soo jeedinaysaa dhamaana Hay'addaha Dawlada, Hay'addaha Caaliga ah iyo dhamaan cidkasta oo ay khusayso in ay wax ka qabtaan arrimaha hoos ku qoran.

- **Arrimaha Dhulka:-** waxaan soo jeedinaynaa in xeryaha ciidamada ee ku xeeran magaalada Berbera ay ku yihiiin caqad hor taagan koritaanka iyo fidida magaalada sidaasi darted waxaanu leenahay waa in dib looga saaro xeryaahaas magaalada.
- **Laamaha Dawlada:-** waa in laamaha xukuumada oo dhami ay ka hawl galaan gobolka, xafiisyadoodana ka furtaan sida ugu dhakhsaha badan.
- **Wadooyinka:-** labada wado ee bariga iyo galbeed ee taga Bulaxaar iyo Laasciidle oo aad loogu baahanyahay sameyntooda.
- **Macdanta:-** waxaa gobolka ku badatay fadhato macdaneed oo wasaarada macdanta iyo biyuhu ka tahay mas'uul.
- **Ugaadha:-** waxaa la yaableh oo aan ku aragnay indhahayaga dad shacab ah oo ajaanib ah oo ugaadhii gobolka laayay, hilibkiina ka dhigaya sida muqumada inta ay qalajinayaan oo dibada u dhoofinaya, fasaxaana cid siisa aan la garanayn.
- **Doorashooyinka:-** waxaan soo jeedinaynaa in Goobaha Doorashooyinka oo aad u yar **(Less Poll Stations).** La kordhiyo, iyo xiliga doorashada ee kulaylka ku beegan oo laga badalo loona badalo xili Berberi qabow tahay.
- **Hay'addaha :-** Hay'add qudha oo caafimaadka ka shaqaysa ayaa ka hawlgasho gobolka, waxaan soo jeedinaynaa in ay hay'addaha kale tagaan gobolka. Hay'adda WFP na waxaan u soo eedinayanaa in ay siiyaan mucaawimooyinka raashinka kana qortaan shaqaalaaha wxiii gobolka kaga aadan.

- **Ciidanka Police:-** in la kordhiyo tirada ciidamada Police ee ka hawlagala gobolka lana tayeeyo aqoontooda ciidan.

XI. MAHAD –NAQ

- Dhamaan anagoo ah mudanayaasha laga doorto gobolka saaxil waxaan mahad balaadhan u soo jeedinaynaa ilaahi noo suuro galiyey in aan safarkaa ku soo dhamaysano nabadgalyo iyo caafimaad.
- Marka labaad waxaan u mahad naqaynaa madaxda gobolka saaxil oo si sharaf badan noogu soo dhaweeyey magaaladayda berbera ee naga soo doortay.
- Marka sadexaad waxaad u mahad naqaynaa hay'adda **UNDP** oo naga taageertay dhinaca safarka aanu ku tagnay Magaaladii naga doortay ee Ber-bera.

******** **Report Prepared By: Abdinasir Osman Mohamoud********

E-mail: dhoobaasi@hotmail.com